

Sharciga lamba. 50 ee 10 Juun 1971.

Ku saabsan isbadalka lagu sameeyay Xeerka 21 Janaayo 1970, lamba. 7 oo ku saabsan Maxkamadda Badbaadada Dalka.

GUDDOOMIYAHA GOLHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Warqadda Koowaad Kacaanka;
Marka uu arkay Xeerka 10 Janaayo 1970, lamba. 3, iyo isbaddaldii ka dambeeyay;
Marka uu arkay Xeerka 21 Janaayo 1970, lamba. 7 iyo isbaddalladii ka dambeeyay;
Marka uu garowsaday baahida loo qabo in isbaddal lagu sameeyo qod. 2 Xeerka 21 Janaayo 1970, lamba. 7.

Marka uu arkay meelmarinta Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU OGGOLAADAY OO ANSIXIYAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Faqrada labaad qod. 2 ee Xeerka 21 Janaayo 1970, lamba. 7, waxaa lagu daray baaragrafka soo socda:

Haddii ay jiraan wax ka reebaya Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka, Maxkamadda waxaa guddoominaya La-taliye uu soo magacaabo Guddoomiyaha iyadoo ay caawinayaan laba La-taliye.

Qod. 2

Xeerkaan deg-deg ayuu dhaqangalayaa waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 10 Juun 1971.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed SiyaadBarre